



Jiiftadana miisaan

Qaybihii hore, dhiska meerisyada gabayga ee heerka isku dhafka alammada («syllables») iyo shaqal dheereyaasha ayaynu isla meel-dhignay. Hadda iyo tanna waa meertadii jiiftada. Sidii gabayga si le'eg xubintan labaad ee maansada magac-bixinteedu iyana waxa ay ku qoto leedahay habaynta gaarka ah ee dhiska meerisyadeedu yeesheen. Taa ayay kaga duwan tahay xubihii kasta oo ka mid ah kuwa maansada. Haddaba magaca gaarka ah ee jiiftada goonida u socday waa mid ku lug leh dhiska meeriskeeda, kaas oo aanay xubin kale la wadaagin. Dhiska meeriska jiiftadu asal ahaan waxa uu ka kooban yahay shan dhis. Afar meeris oo shantaa ka mid ah mar-mar baa hal shaqal dheere oo siyaado ahi ku soo bixi karaa. Inta asalka ah dhiskoodu waa kuwan soo socda. Ha moogaan in jiidintu kala socdayso alammada ereyga ka kooban mid wax ka badan. Tirada meeriska ku hor qoranna, ta hakadka ka horreysaa waxa ay sheegaysaa inta alan ee meeriska ku jirta. Tirada hakadka ka danbaysana waxa ay sheegeysaa inta shaqal dheere ee meeriska ku jirta. Waa intaa waxa aynu heerkan ku muujinaynaa.

5,4

- 5,4 = Waa soo soc-daa-yoo
- 5,4 = Kii saa-ka joo-gaa
- 5,4 = Saab-kaa u yee-sheen
- 5,4 = Xaal waa ma-qaar-saar
- 5,4 = Suul-kaa-ba gaa-dhee

N.B. Alanka badhtamaha ah oo weligiiba meeriskan shaqal gaab ka ah mooyi e afarta hareeraha ka xigaaba waa shaqal dheereyaal. Haddii dhiskiisu sidaa u qotonsan waayo waa in uu kuwa soo socda ka mid noqdaa ama uu jabaa.

6,3

- 6,3 = A-qal-kii-nu waa kee?
- 6,3 = Waa se-benxu-maad-oo
- 6,3 = Nin-ka soo soc-daa mee?
- 6,3 = Wax ma soo si-daa sheeg?
- 6,3 = Ruu-xii cur-yaan a-hi.

7,2

- 7,2 = Dac-wad baan ka lee-ya-hay
- 7,2 = Qof-na ka-ma bad-baa-deen
- 7,2 = Xa-raf-kaa ma ga-ra-taa
- 7,2 = A-ma so-cod-ka qaar-kii
- 7,2 = Diin-ti-yo dal-kii-na-ba.

8,1

- 8,1 = Cu-li-ma-da dul qaad-ka leh
- 8,1 = I-ya-doo nin sa-re qa-bo
- 8,1 = Ruux sa-cab-ku ma-dhan-ya-hay
- 8,1 = Naf-ta si-gato ge-li-yoo
- 8,1 = Mar-ka aa-nay du-ni-da-ni

9,0

- 9,0 = Wa-xa Sa-xar-li ku-gu ti-dhi
- 9,9 = La-gu su-ga-yo dhi-ma-sha-da
- 9,0 = Nin-ka wa-ran-ka ku-la he-lay
- 9,0 = A-ma a-ni-ga i-la ta-hay
- 9,0 = Nin la si-gay ma na-bad ga-lay?

(Waa innoo berri)
Cabdullaahi Diiriye Guuleed

XIDDIGTA OKTOOBAR, 6/14
16. 7. 1978, p. 3.

Jiiftadana miisaan

QAYBTII LABAAD:

Kolkanna eeg meerisyada: 6,3; 7,2; 8,1; 9,0 oo shaqal dheere jiristiisa laga kaaftoomi karaa raacay. Meerisyada soo socda mid kastaba bal u qiyaas ka hoos yaalla oo kaalintii shaqal dheeraha aan loo baahmayni ku jiray la geliyey shaqal gaab. Kee baa adiga labada meeris kula cuddoon?

- 6,4 = Mar waan kuu si-fee-yaa
- 6,3 = Mar ma kuu si-fee-yaa?
- 6,4 = Mu-xuu soo si-daa sheeg?
- 6,3 = Wax ma soo si-daa sheeg?
- 7,3 = Hees-ta siin-ka joog-ti-yo
- 7,2 = Run-ta siin-ka joog-ti-yo
- 7,3 = Saa-ka waa ku noo-la-hay
- 7,2 = Sa-ka-raad ku nool-ya-hay
- 8,2 = Saa-ri-waa-yey a-ni-gu-ye
- 8,1 = Sa-ri-waa-yey a-ni-gu-ye
- 8,2 = See-ri-hii-sa la-ma ga-lo
- 8,1 = Sa-ri-hii-sa la-ma ga-lo
- 9,1 = Had-dii ti-ma-ha la-ga ja-ro
- 9,0 = Kol-ka ti-ma-ha la-ga ja-ro
- 9,1 = Ma see-xa-ne Can-ba-ro sa-gal
- 9,0 = Ma sa-xa-ne Can-ba-ro sa-gal

Meerisyadan aynu soo bandhignay waxa ka muuqda in sidii loo dayaba ay ka masoobaan, shaqal dheere keli ah oo mid la dheeryahay inooyaan e. Haddaba weydiinta taallaa waxa ay tahay, labaduba asal ma wada noqon karaan? Maya. Haddii aanay labaduba wada noqon karinse, kee baa asal ah; kee baase farac ah? Labada hadba kii dhadhan jifto ahaaneed ku cuddoon baa asalsan sida: 6,3; 7,2; 8,1; 9,0. Ka shaqal dheeraha siyaadada ah wataana waa farac. Waa sida ay aniga ila tahay, doodise ka furan.

Haddii aynu markii hore farcamaha shaqal dheere ka gaabinay, bal haddana eeg meerisyadan alan shaqal gaaban leh laga xooray, dabadeedna meeris kale ku habaysmay. Bal hadda iyana kala dhadhanso ka kula cuddoonaada.

- 6,4 = Xaal-ka-naan ku sii-yee
- 5,4 = Xaal baan ku sii-yee
- 7,3 = Waa mid qu-rux u jee-ddoo
- 6,3 = Waa qu-rux u jeed oo
- 8,2 = Sa-gaal be-ri a-doo wa-dey
- 8,1 = Geel ba-ri a-doo wa-dey
- 9,1 = Ma see-xa-tay Can-ba-ro sa-gal?
- 8,1 = See-xa-tay Can-ba-ro sa-gal.

Waxa halkaa ka soo baxay in aan meerisyada asal-ka ah alan iyo shaqal dheere toona laga jari karayn. Kuwase faraca ah ee shaqal dheeruhu siyaadada ku yahay laba arrimoodba waa u xalaal. In tusmada shaqal dheeraha faaltuuga ahi galay ku gaaban lagu beddelo ama in meeriska alan shaqal gaaban leh laga tuuro. Hadda ogow in labada goorba ka la beddelayo ama la tuurayaa uu yahay mid gaar ah ee aan mid kasta la tuuri karin. Taa xaqiijinteeda waxa aynu ka ga bogan heerka labaad ee la baxay «Tusmaynta Shaqallada». Haddaba jiftadii iyo heerkii isku dhafka alammada iyo shaqal dheereyaasha halkaa maantana inoogu dabar.

«DHAMMAAD»

W.Q. Cabdillaahi Diiriye Guuleed